

## **Somali**

### **Xarunta Cadaalada Bulshada**

#### **Waa maxay Xarunta Cadaalada Bulshadu?**

Xarunta Cadaalada Bulshada (CJC) waxaa sameeyey Dawlada Northern Territory si ay ugu qabato adeegyada dhexdhexaadinta bulshada uguna caawiso dadka xalinta is afgaranwaagooda iyagoon qaadin tallaabo sharci ah. Adeegeenu waa bilaash, qarsoodi, iskaa, mid wakhtiyaysan ayna sahlana tahay isticmaalkiisu.

#### **Waa maxay sababta dhexdhexaadintu?**

Dhexdhexaadintu waxay ku saabsan tahay isu imaatanka dadka si ay uga wada hadlaan arimaha lagu muransan yahay. Waxay u ogolaaneysaa dadka is afgaran la'a oo dhan inay wax ku lahaadaan natiijada oo ay keenaan xalkooda arinta ku saabsan. Waxay siinaysaa si lagu xaliyo is afgaranwaaga iyagoon tallaabo sharci ah la qaadin, oo noqon karta mid wakhti badan qaadata qaalina ah.

CJC waxay bixineysaa jawi aan toos ahayn oo ammaan ah oo ay dadku ku xalin karaan is afgaranwaagooda iyagoo caawimaad ka helaya dhexdhexaadiyayaal tababaran.

Kulamada dhexdhexaadinta ee CJC waxaa qabta mid ama laba dhexdhexaadiyayaal tababaran oo aanan dhinacna la safaneynin oo ku caawin doona:

- Garo arimaha
- Ka feker siyaalo lagu xaliyo arimaha
- Ka feker talaabooyinka kale
- Wada shaqeeya si aad u gaartaan heshiis.

Dhexdhexaadiyayaashu waxay hogaamiyaan sida fadhiga loo maamulayo. Dadka is afgaran la'a waxay go'aamiyaan waxa laga wada hadli doono iyo waxa lagu heshiiyey.

Dhexdhexaadiyayaashu waa kuwo dhexdhexaad ah oo aanan dhinacna raacsaneyn ama bixiya tallo sharciyeed.

Boqolkiiba 85 wax ka badan dhexdhexaadintu waxay natiijadoodu noqotaa kuwo go'aan lagu qaato.

Xaaladaha badidooda isla markiiba waa la qaban karaa wuxuuna qaadan karaa ugu dhawaan 2-4 saac.

#### **Is afgaranwaagee baa ku haboon dhexdhexaadinta?**

CJC waxay kugu caawin kartaa is afgaranwaayo aad u ballaaran oo ay ku jiraan:

- Bulshada xaafada/is afgaranwaaga derisyada sida waxyaalahan deyrka, buuqa, xayawaanka la korsado, dhirta, waxyeelaynta hantida iyo dabeecada dadka
- Goobta shaqada -isgaarsiinta
- Naadiyada iyo ururada ay xubnahoodu muransan yihiin
- Xirriirka xubnaha qoyska ka dhaxeeya
- Qaasheegadka yar yar/qaansheegadka madaniga ah
- La hadlida dembiilaha dhibanaha
- Noocyo badan oo kale oo ah is afgaranwaa

#### **Sida loo sameysto dhexdhexaadinta**

Waxaad soo wici kartaa taleefankayaga bilaashka ah, iimeyl ayaad noo soo qori kartaa ama qof ahaan ayaad na soo booqan kartaa.

Waxaa la helayaa adeeg turjumaan bilaash ah.

Markaad taleefan u soo dirto CJC shaqaalaha khibrada leh ayaa:

- Kaala hadli doona dhibaataada oo kaala hadli doona siyaalaha aad adigu u xalin karto
- Ku siin doona macluumaad iyo/ama ku sii gudbinaya
- Qiimeynaya haddii is afgaranwaagaagu ku haboon yahay dhexdhexaadin haddii ay sidaa tahay, waxaad adiga iyo qofka/dadka kale ee ku lugta leh saluugsan tihiin iyo
- Ogolaanshahaaga ka dib waxaan la xirriireynaa qof/dadka kale si aan idiinku sameyno wakhti dhexdhexaadineed oo labadiinaba idinku haboon.

Dhexdhexaadinta waxaa la sameyn karaa maalintii, fiidkii ama Sabtida iyo Axada.

Dhexdhexaadinta waxaa lagu qabtaa Xarunta Cadaalada ee Darwin ama meelo dhow oo ku haboon oo ku yaal Territory-ga.

Waxaa sidoo kale la sameyn karaa shir taleefanka ah.

**Xirriirka**

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo caawimaad:

Taleefan: 1800 000 473

Fakis: 08 8999\*6226

Iimeyl: [cjc.doj@nt.gov.au](mailto:cjc.doj@nt.gov.au)

Warqad u soo qor:

GPO Box 1722

DARWIN NT 0801

Qof ahaan adigu kaalay:

1<sup>st</sup> Floor

Darwin Magistrates Court

Nichols Place

Darwin NT 0800